Daryeelka Caafimaadka ee Bilaashka ah ee loogu talagalay Dadka Aan Awoodin inay Iska Bixiyaan Kharashka — 2026

Sharciga Maine wuxuu u baahanyahay in daryeelka caafimaadka oo bilaash ah la siiyaa dadka reer Maine oo ay la jiraan daqliga ka hooseeyo boqolkiiba 200 ee heerka saboolnimada faderaalka. Dadka degan New Hampshire ee daryeel ka hela Isbitaalka Memorial iyo/ama xarumaha kale ee dhakhaatiirta ee MaineHealth ayaa sidoo kale u qalmi kara barnaamijka daryeelka bilaashka ah.

Cabirka Qoyska	200%
1	$31,920.00
2	$43,280.00
3	$54,640.00
4	$66,000.00
5	$77,360.00
6	$88,720.00
7	$100,080.00
8	$111,440.00
Dheeraad Walba	$11,360.00

Si aad u dalbato kaalmo dhaqaale, fadlan naga soo wac: Xafiiska Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka lambarka sida bilaashka ah lagu waco 866-804-2499 inta lagu gudajiro wakhtiyada shaqada Isniinta ilaa Jimcaha socoto 8 subaxnimo-4:30 galabnimo.

Iskaan garee koodka QR si aad u codsato ama baro wax badan

Dalacaadyada Ma Dhaafeyso Tirada Guud ahaan loo Diro Medicare

Haddii laguu oggolaaday kaalmada dhaqaale sida ay dhigayso siyaasaddayadu oo oggolaanshahaaguna aanu daboolayn boqolkiiba 100 lacagta adeegyada aanu kuu qabanay, lagugu soo dallici maayo wax dheeraad ah oo loogu talagalay daryeelka gurmadka ah ama daryeelada kale ee caafimaad ahaan daruuriga ah, marka loo eego xaddiga caadi ahaan lagu dallaco bukaanada caymiska leh.

Kaliya daryeelka caafimaadka muhiimka ah ayaa loo bixiyaa sida daryeel bilaash. Haddii aadan u qalmin daryeelka caafimaadka oo bilaash ah, waxaad codsan kartaa dhagaysi xaqsoor. Waxaan kuu sheegi doonaa sida loo codsado dhagaysiga xaqsoorka ah.

Ka-reebitaannada Daryeelka Bilaashka (free care) ah/Adeegyada Xaddidan

- Qalliinka isqurxinta/bilicda, oo ah habraac loo sameeyo oo keliya ujeeddada lagu hagaajinayo muuqaalka bukaanka (marka laga reebo qalliinka dib-u-dhiska), kuma jiro adeegyada daryeelka caafimaadka ee bilaashka ah.
- Qalliinka Cayilka Caloosha wuxuu Free Care daboolaa kaliya haddii dhakhtarku qoraal ku caddeeyo daruurinimadiisa caafimaad.
- Wuxuu Free Care daboolaa Qalliinka Ilkaha, oo ah qalliin loo sameeyo ujeedada kaliya ee ah saarista ilko caabuq ama wax kale ku dhaceen, kaliya haddii dhakhtarku qoraal ku caddeeyo daruurinimadiisa caafimaad.
- Qalliinnada la xiriira dhalmo la'aanta ma bixinayaa Free Care
- Qalliinnada la xiriira dhalmo-joojinta waxaa daboolaa Free Care oo kaliya haddii dhakhtarku qoraal ku caddeeyo daruurinimadiisa caafimaad.
- Farmashiyaha Tafaariiqda

Siyaasadda Gargaarka Maaliyadeed

Siyaasadda Kaalmada Maaliyadeed ee MaineHealth waxaa laga heli karaa boggayaga internetka ee MaineHealth.org oo hoos yimaada Kaalmada Maaliyadeed. Nuqullo ayaa sidoo kale laga heli karaa meelaha soo socda:

- *MaineHealth Behavioral Health at Spring Harbor, 123 Andover Road, Westbrook, ME 04092*
- *MaineHealth Franklin Hospital, 111 Franklin Health Commons, Farmington, ME 04938*
- *MaineHealth Lincoln Hospital, 35 Miles Street, Damariscotta, ME 04543*
- *MaineHealth Lincoln Hospital, 6 St. Andrews Lane, Boothbay Harbor, ME 04538*
- *MaineHealth Maine Medical Center Biddeford, 1 Medical Center Drive, Biddeford, ME 04005*
- *MaineHealth Maine Medical Center Portland, 22 Bramhall Street, Portland, ME 04102*
- *MaineHealth Maine Medical Center Sanford, 25 June Street, Sanford, ME 04073*
- *MaineHealth Memorial Hospital, 3073 White Mountain Highway, North Conway, NH 03860*
- *MaineHealth Mid Coast Hospital, 123 Medical Center Drive, Brunswick, ME 04011*
- *MaineHealth Pen Bay Hospital, 6 Glen Cove Drive, Rockport, ME 04856*
- *MaineHealth Stephens Hospital, 181 Main Street, Norway, ME 04268*
- *MaineHealth Waldo Hospital, 118 Northport Avenue, Belfast, ME 04915*

Siyaasadda Kaalmada Maaliyadeed ee MaineHealth waxaa lagu heli karaa Ingiriis, Carabi, Shiine (La Fududeeyay), Faransiis, Bortuqiis, Soomaali, Isbaanish iyo Fiitnaam.